

Asylum Advice

Codsiga
Magangalyo



Section 1:

Codsiga Magangalyo

1.1 Miyaad u baahan tahay inaad samayso codsi magangalyo?

Waa inaad codsi magangalyo (badbaadin caalimi ah) samayso oo kaliya haddii aad ka cabsanaysid inaad ku laabato dalkaaga. Si lagugu aqoonsado qaxooti sida u qabo Xeerka 1950 ee Qaramada Midoobey (1951 United Nations Convention) oo ku Salaysan Aqoonsiga Qaxootinimo, waa inaad ka soo tegtay dalkaaga oo aanad awoodin inaad ku laabato sababtoo ah waxaad qabtaa cabsi dhab ah in lagu caddibo, kaaso ku salaysan sababahaan:

- Jinsiyaddaada
- Diintaada
- Dhalashadaada
- Ra'yigaaga siyaasanimo; ama
- Xubinnimadaada koox bulshadeed gaar ah

Haddii la go'aamiyo inaad qaxooti eheen, sababtoo ah codsigaaga uusan ku salaysneen hal ka mid ah shanta sababood ee kor ku qoran, laakiin ay jiraan sababo kale ee lagu aaminsan yahay inaad qabtid halis dhab ah haddii aad ku laabato dalkaada, markaas waxaad u qalmi kartaa badbaadin bin'aadinimo.

Haddii aadan u malayn inaad xaq u leedahay badbaadin caalami (magangalyo ama Badbaadin Bin'aadinimo) laakiin weli aad rabtid inaad joogto dalka Ingiriiska (UK) sababo kale awgeeda, waa inaad raadsataa talo sharciyeed.

Haddii codsigaaga badbaadinta caalamka la diido wuxuu saamayn ku yeelan karaa dhammaan codsiyada fasaxa deganaanshada aad ka sameyso dalka UK.

1.2 Halkee ka codsan karaa magangalyo?

Miyaad joogtaa garoonka dayuuradaha, dekad ama saldhig tareen caalami ah? Haddii aad rabtid inaad codsato magangalyo waa muhiim inaad samayso sida ugu dhaqso badan markaad soo gasho dalka Ingiriiska. Haddii aad ka soo carrartey caddibaad oo u baahan tahay badbaado, markaa waa inaad codsato inaad la hadasho sarkaalka laanta socdaalka. Markaad la hadasho sarkaalka laanta socdaalka waxaad u baahan doontaa inaad xaqiijiso inaad magangalyo ka codsanayso dalka Ingiriiska khatarta aad ku jirto awgeed.

Miyaad durba joogtaa dalka Ingiriiska?

Haddii aad rabtid inaad codsato magangalyo oo aad joogto dalka UK, waa inaad samaysato ballan aad ku tagto qaybta qaabisha magangalyo-doonka (Asylum Intake Unit) ee ku taala xaafadda Croydon (Koonfur-Bariga London). Waa inay ku raacaan dhaammaan tiirsanayaasha qaybta ka ah codsigaaga magangaalyaada. Waa muhiim inaad samayso codsi magangalyo sida ugu dhaqso badan markaad soo gasho dalka Ingiriiska ama isla markaad ogaato in xaaladahaaga is-beddeley oo aad iminka u baahan tahay badbaado caalami ah. Fadlan ogow in uusan Home Office kaa bixinayn kharajka safarka ama gaadiid raaca aad ku tagaysid Croydon.

Nidaamka ballanta ee kor ku xusan waxaa dheeri ka ah in Asylum Intake Unit ay qiimaynayso dadka araaajida soo qorta oo yimaada ama soo xaadira goobta adeegga. Hase yeehee, ma jiro ballanqaad ah in wax ka qabadka arjigaagu uu ku dhammaanayo isla maalintaas. Waxaa laga yaabaa in laguugu taliyo in aad dhigatid ballan kale oo lagu dhammaystiro arjigaaga.

Khadka ballamada Asylum Intake Unit waa: 020 8196 4524

Saada ow xafiska add adikarto wa snnanta ella kamista 9 soabaxta - 4.45 asarta jomada 9.00 sobaxta alla 4:30 asarta.

Asylum Intake Unit wuxuu ku yaalla Lunar House, 40 Wellesley Road, Croydon CR9 2BY

Haddii aad u baahan tahay inaad beddesho ama joojiso ballankaaga, fadlan sida ugu dhakhso badan telefoon u soo dir 020 8196 4524.

Haddii aad tahay qof nugul (vulnerable) isla markaana aad ku sugantahay Scotland waxaa laga yaabaa in laguugu oggolaado waraysigaaga bilowga ah (screening interview) in uu ka dhaco Glasgow. Hase yeeshee sidani waa haddii ay la noqoto (discretionary) Home Office-ka waxaana lagu go'aaminayaa kiis walba sida uu yahay.

1.3 Talo iyo hanuunin khuseeya codsiga magangalyada iyo hab-socodka magangalyada


Asylum Help wuxuu qayb ka yahay hay'adda samafalka Migrant Help. Ayagoo u maraayo Asylum Help ururka wuxuu magangalyo-doonka siiyaa talo iyo hanuunin. Asylum Help waxa ay bixin kartaa talo siin ah BILAAS (FREE) ama lacag la'aan, hagrid iyo macluumaad ku saabsan magangalyada (asylum), nidaaminta socodsiinta magangalyada, hoy ama guri dejinta, kaalmada lacageed, helitaanka wakiil sharciyeed (legal representation), iyo caawimaad kale ee ku saabsan arrimaha magangalyo doonka.

Macluumaadka hab-socodka waraysiga koowaad ee magangalyada, waraysiga wayn iyo wixii dhaca markii go'aan laga gaaro kiiskaaga, waxaa lagu heli karaa hab qoraal ama cajalad ah markii la galo bogga internetka Asylum Advice UK. Kuwaani waxaa lagu

heli karaa 15ka luqadood ee ugu caansan. Fadlan booqo boggeena internetka www.asylumhelpuk.org.

Haddii aad jeceshahay in aad si toos ah ula hadashid qof lataliye ah, fadlan si BILAASH ah u wac khadka kaalmada (helpline) ee Asylum Advice UK helpline oo ah: 0808 8000 640. Fadlan ogow in Asylum Help uusan ku siin karin talo sharciyeed ee khuseeya codsigaaga magangalyada.

Naqsadda Habraaca Magangalyo Doonka



1.4 Miyaad u baahan tahay Taageerida Magangalyada?

Haddii aad doonaysid in aad dalbatid ama aad arji u qoratid kaalmo magangalyo marka la diiwaangaliyo codsigaaga ama lagu siiyo ballan waa in aad markaa soo wacdid khadkayaga BILAASHKA AH (our FREE helpline):

Asylum ka wac 0808 8000 641

Adeeggaan waxaa lagu bixin karaa luqad aad fahmi kartid.

Macluumaad dheeraad ah ee khuseeya taageeridda magangalyada waxaa laga heli karaa: www.asylumhelpuk.org

Haddii aad tahay guri-laawe ama aanad is-taageeri karin (is-masruufi karin), fadlan hubi inaad kani ku caddayso waraysiga koowaad. Home Office wuxuu qiimayn doonaa haddii aad u baahan tahay hoy ku meel-gaar ah, oo ay bixin karaan waraysiga koowaad kadib.

Haddii lagu diidey in lagu siiyo guri markii lagu ballamiyey lagaana qaaday waraysigii bilowga ahaa (screening interview) markaa Asylum Help kaama caawin karto in aad guri heshid isla markiiba hase yeeshee waxay kuu fidin kartaa caawimaad wakhti dheer (long term support).

Haddii aad UK ku soo gashay visa amase aad adigu isugu filan tahay in aad is caawintid waa in aad markaa si buuxda u caddaysid sidii aad isugu filnayd iyo halka aad ku kharaj garaysay lacagta. Waa in aad muujisaa sababta aysan caawinaaddani u sii socon karin. Waxaa lagaaga baahan yahay in aad waraysigaaga (screening) keentid wixii caddayn ah ee aad heli kartid.

1.5 Taageeridda Laabashada Ikhtiyaariga ah

Haddii aad go'aamiso inaad rabin inaad codsato magangalyo, oo aad tahay qof sharci darro ku joogo dalka UK oo aad rabtid inaad dalkaaga ku laabato, waxa suurtoagal ah inaad caawinaad ka hesho barnaamajka Dib u Noqoshada Rabitaanka ah ama Ikhtiyaariga ee ay saaciddo Home Office.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxa aad ka eegtaa:

www.gov.uk/return-home-voluntarily

Kooxda Ambabixidda Ikhtiyaariga (Voluntary Departures Team): 0300 004 0202.

Macluumaad dheeraad ee khuseeya qayb walba ee qaybtaan fadlan la xiriir Asylum Help:

www.asylumhelpuk.org

Asylum Advice UK 0808 8000 640

Asylum Support Application UK 0808 8000 641